Caddad Gaar ah oo ku aaddan Waxbarashada

Warsidaha UNICEF Soomaaliya Febraayo 2009

Waxbarashadu waa calaamadda rajada ee mustaqbalka Soomaaliya

Waxaa qorey Christian Balslev-Olesen
Wakiilka, UNICEF Soomaaliya

Nooca dhibaatada ka jirta Soomaaliya ayaa UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu ku khasbeysa in ay waxqabyada nafaha lagu badbaadinayo ku dheelitiraan kuwa yoolalka muddada fog. Haseyeeshee, ka dib markii sanado badan la dayacay nidaamyadii waxbarashada, oo iskahorimaadyaduna ay jiil carruur iyo dhalinyaro ah ka horistaageen dugsiyada, markaa waxbarashada ayaa kaalin weyn ka geleysa wax ka qabashada arrimaha deggegga ah iyo dib-u-dhiska ka dambeeya iskahorimaadya.

Waxbarashada ayaa sal u ah horumarka bulsho-dhaqaale waxaana ay door aasaasi ah ka ciyaartaa dhisidda kartida dadka waxaana ay koritaanka dhaqaalaha ku dedejisaa xoogga bulshada ee aqooneed, xirfadeed iyo halabuur. Waxbarashada ayaa sal u ah degganaanshaha siyaasadeed iyo tan bulsho ee muddada fog.

Soomaaliya waxa ay ka mid tahay dalalka dunida oo dhan ay ugu yar yihiin xaddiga carruurta isu qorta dugsiyada hoose, iyo qiyaasta xaddiga ugu hooseeya ee akhir-qorista dadka waaweyn. Xaddiga guud ee isqorista dugsiyada ee gabdhaha waa 25% halka kan wiilasha uu ka yahay 37% (*Somalia Primary Education Survey* (PES) 2006-07), xaddiga haweenka qaangaarka ah ee wax akhrin/qorina kara waa 27% halka uu kan raggu ka yahay 50%. Nasiib wanaag, dadaal sanad socdey oo ay sameeyeen ka-hawlgalayaasha waxbarashada, oo ay hoggaaminayaan bul-

Nimco Axmed Maxamuud, 13, oo ka mid ah ka faa'iideystayaasha naadiyada carruurta ka dhexeeya ee UNICEF. Sheekada ka eeg bogga 3aad. © UNICEF Soomaaliya/2008

shooyinka, ayaa lagu gaarey in tiro kordheysa oo wiilal iyo gabdho ah ay isu qoraan dugsiyada aasaasiga ah. Laga soo bilaabo sanadkii 2000, carruurta isuqortey fasallada 1-8 ayaa qiyaastii korodhey 300%, qiyaastii min 150,00 ilaa in ka badan 460,000. Haseyeeshee, sanadkii 2008 ayaa carruur badani ay ka tagtey waxbarashada gaar ahaan degaannada ay iskahorimaadyadu ka dhaceen sida Muqdisho, halkaas oo ilaa 134 dugsi la xirey ama ay degeen maliishiyo, iyo sidoo kale waxaa arrintaa keeney sababo la xiriira guurguuridda faraha badan ee bulshooyinka ay rabshaduhu saameeyeen. Laga soo bilaabo Siddeetameeyadii (1980s), adeegyada waxbarashada ee Soomaaliya ayaa waxaa badiba bixinayey ururo ku dhisan bulshooyinka, dalladaha waxbarashada degaanka, NGO-yo iyo Dugsiyada Qur'aanka.

Macallimiinta ayaa waxaa ay ujuuradoodu ay badideedu ka timaaddaa ujuurada ardayda laga qaado, in kasta oo dowladaha Maamullada Soomaaliland iyo Puntland ay tiro kordheysa oo macallimiin ah ay siinayaan mushaaraad – Puntland ayaa qaadatey siyaasad ay ku kordhineyso macallimiinta ay mushaaraadka siiso 200 oo macallin sanadkii, Soomaaliland ayaa iyana qiyaastii 4,000t ee macallin, ay 2100 ka mid ah ay mushaarkooda bixisaa Wasaaradda Waxbarashadu.

Eeg bogga 8aad (bogga ugu dambeeya)

CADDADKAAN KA EEG

Faallada Wakiilka UNICEF	1/8
Xaaladdaba ha ku xumaatee, Dugsigani waa soo ifbaxay	1-2
Arday haysa hawlo degdeg ah	2
Naadiyada Carruurta Dugsiyada	3/4
Min geed-hoostii ilaa fasal	4
Horumar lagu gaarey waxbarashada dadban	5
Waxbarashada taageeridda bulshada	6
Dugsiyo Qur'aan oo caawiyey carruur	6/7
Caadada haweenka iyo waxbarashada gabdhaha	7
Dib ugu celinta bulshada	8
Nagala Soo Xiriir	8

Si kasta oo ay xaaladdu ugu xumeyd, Dugsiga Xamar Jab Jab ayaa ka soo if-baxay Muqdisho

Dugsiga Aasaasiga ah ee Xamar Jab Jab waxa uu ku yaalla degmada Xamar Jab Jab ee magaalada Muqdisho, meel nus kiilo mitir u jirta dekadda. Fasalladii iyo dhammaan dhismayaashii hore ee dugsiga ayaa gebi-ahaanba burburey, dugsigii bilicda samaa ee mar ay dhigan jireen ku dhowaad 2,000 oo arday (990 carruur ah halkii gelinba) oo celcelis ahaan 45 carruur ah uu qaadi jirey halkii fasal, kaas oo aan la isticmaalin ku dhowaad labaatan sano.

Dhammaadkii 2007da UNICEF ayaa USAID ka heshey deeq ku aaddan mashruuc la magac baxay 'Integrated Social Services Delivery to Support Recovery and Stability in Southern Somalia'. Danta laga leeyahay mashruucan ayaa ah taageeridda bixinta adeegyada bulshada ee waafaqsan Qorshaha Kalaguurka ee Qaramada Midoobey iyo ku xiridda gargaarka bani'aadamnimada ee hadda jira oo lagu xiro dowladaha hoose ee rajada leh.

Dugsiga Cusub ee Xamar Jab Jab © UNICEF Somalia/2008

Mashruuca ayaa lagu qaabeeyey saddex qodob oo isla xiriira: kobcinta adeegyo biyo-helid iyo dhiirrigelinta fayadhowr iyo nadaafad wanaagsan, iyo badinta helidda waxbarasho aasaasi ah, iyo wanaajinta helidda adeegyada Taranka (hooyanimada), Carruurta Dhalatey iyo kuwa daryeelka Caafimaadka Carruurta.

eeg bogga 2aad

Xamar Jab Jab ayaa mar ahaa dugsi bilicsan oo ay dhigtaan 2000 oo carruur ah...

UNICEF ©Carruurteenna

Carruur safka hore ka gashey wax ka qabshada xaaladda degdegga ah ee Soomaaliya

Iyada oo ay jiraan dhibaatooyinka bani'aadamnimo ee aan hore Soomaaliya u soo marin, Naadiyada Carruurta-ka-dhexeeya ayaa hoggaaminayey abaabulka iyo u qareemeynta dhiirrigelinta xuquuqda ay carruurtu u leeyihiin waxbarasho, ilaalin iyo wanaajin.

Naadiyada Carruurta ka dhaxeeya ee dugsiyada ee ka jira degmada Jowhar ee gobolka Shabeellaha Dhexe, ayaa muujiyey doorka muhiimka ah ee ay carruurtu ka cayaari karaan wax ka qabashada arrimaha degdegga ah. Naadiyada oo ka jirey Shabeellaha Dhexe labadii sano ee u dambeeyey ayaa sii abaabulaya carruurta in ay tagaan dugsiyada, ka qayb-qaataan wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah oo ay baraan bulshadooda muhiimadda ay waxbarashadu leedahay.

31kii Agoosto 2008 tuulada Labo-Wab ee ka tirsan degmada Jowhar ayaa uu dab dhulka dhigey. Tuulada oo ay degganaayeen dad gaaraya 1,800 oo qof ayaa waxa ay dadkaa ku waayeen wax walba oo ay haysteen oo ay ka mid yihiin guryo, dhismayaal, agabka guryaha, iyo hanti kale. Dugsigii keliya ee tuulada ku yaalley ayaa bas-beeley, taas oo 83dii arday ee dugsiga (29 ay gabdho ahaayeen) ku keentey in ay ka rajo dhigaan in weligood ay heli doonaan waxbarashadii ay ku riyoonayeen.

Shabakad Naadiyada Carruurta Ka dhexeeya ah oo ka dhisan degmada Jowhar ayaa isla markiiba tallaabo qaaddey oo wax u qabatey dadkii ay masiibadu taabatey. Naadiga dugsiga ayaa dhisey guddi waxqabad waxaana uu gargaar bani'aadamnimo uu qoysaskii ay dhibaatadu soo gaartey uga raadiyey beelaha la deriska ah.

Dhammaadkii hawsha, Naadiga Carruurta ka Dhexeeya waxa uu soo ururiyey afar xirmo oo dhar ah iyo lacag gaareysa 2,400,000 oo Shilin Soomaali ah (oo u dhiganta $80).

6dii Sebtembar 2008, xubnaha Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya waxa ay soo rarteen gaari waxaana ay yimaadeen tuulada Labo-Wab waxaana ay dharkii iyo lacagtii u qaybiyeen qoysaskii ay dhibaatadu soo gaartey. Waxaa ay door-bideen oo

Naadiyada dugsiyada oo hawl ka haya Labo-Wab © UNICEF Somalia/2008/MHashi

ay u roonaadeen qoysaskii ay carruurta dugsiga u dhiganeysey. Intaa ka dib, naadiyadu waxa ay markaa ku dhaqaaqeen olole ay ku abaabulayaan tuulada si loo soo celiyo waxqabadyadii waxbarashada ee dugsiga tuulada. Xubnaha naadiga ayaa hal hal u booqdey guryaha tuulada si ay waalidiinta ugu qanciyaan in carruurtooda ay dib ugu soo diraan dugsiga. Taa waxa ay keentey in bulshada Labo-Wab ay ka soo jawaabaan ololihii naadiga dugsiga ayna u diyaariyaan carruurta geed hoostii oo ay wax ku bartaan. Maanta 83 carruur da'dii dugsiga ku jirta oo dugsigooda ku waayey dabkii ayaa waxbarashadoodii wata oo waxbarashada ka sokowna helaya taageero nafsaani iyo mid bulsho. UNICEF ayaa sidoo kale taageereysa dhismaha laba fasal, xafiis, berkad biyo iyo musqulo si loo wanaajiyo degaanka waxbarashada iyo si dugsiga looga dhigo mid ilmaha u roon.

Bogga 3aad ka eeg faahfaahin dheeri ah oo ku saabsan Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya.

Xaaladaba ha ku xumaatee, Xamar Jab Jab ayaa Muqdisho ka soo if baxay

Ka yimid bogga 1aad

Taageeridda bixinta adeegyada isku jira, iyo dhisidda door la aamini karo oo ay ciyaaraan dowladaha hoose, waxaa si caqligal ah looga fili karaa in marka ay dad badan helaan adeegyada aasaasiga ahi ay taa ka dhalan karto degaan taageeraya nabadda iyo dib-u-heshiisiinta, taa oo faa'iidooyin la taaban karo siin karta bulshooyinka nugul.

Bulshada degmada Xamar Jab-Jab waxa ay waxbarashada siiyeen muhiimadda ugu weyn. In kasta oo dhibaatooyin aad u xun ay ka jiraan Muqdisho, shir wada-tashi oo ay la yeesheen UNICEF waxa ay bulshadu ku aqoonsadeen in dayactirka dugsigii hore ee Hoose/Dhexe Xamar Jab-Jab uu gacan weyn ka geysan karo caadiyeyn xaaladda degmada, uuna taageeri karo hay'adaha qaranka ee liita.

Shir wadi tashi oo xigey oo ay ka qaybqaateen UN-HABITAT, oo ay lahawlgeleyso SAACID oo ah NGO caalami ah ayaa la qabtey si loo kala muhiimad siiyo wanaajinta kaabayaasha degmada iyo si loo sameeyo mashruuc lagu xoojinayo maamulka degaanka ee dhinaca bixinta adeegyada. Halkaa ayaa ay bulshadu ku xaqiijiyeen dadaalka joogtada ah ee ay ugu jiraan waxbarashada, iyaga oo dayactirka Dugsiga Hoose/Sare ee Gahayr iyo Dugsiga Hoose/Sare ee Xamar Jab Jab ka dhigey arrinta saddexaad ee ugu muhiimsan iyaga oo ku xiga Ururinta Qashinka iyo dayactirka Suuqa Ansalooti.

UNICEF, oo la tashaneysa Wasaaradda Waxbarashada, ayaa UNOPS u xilsaartey qiimeynta goobta waxaana ay ogaatey in dhismaha uu aad u baaba'ey iyo in maaddaama uu burburkiisu aad u weynaa laga wanaagsan yahay dayactirkiisa. Dib-u-dhiska dugsiga ayaa ahaa xalka keliya ee furnaa, waxaana la sameeyey naqshad cusub iyada oo la qorsheeyey in la banneeyo goobta iyo in dugsi cusub la dhiso. Iyada oo taageero farsamo laga heley UNICEF, waxa ay UNOPS naqshad cusub u sameysey dugsiga oo ka koobnaa 22 fasal, maktabad, qolka macallimiinta, xafiisyada maamulka, iyo adeeg biyo iyo fayadhowr, dhismIhiina waxa uu bilowdey Agoosto 2008.

In kasta oo ay dagaalladu ka socdeen caasimadda, ay nabadgelyo xumaduna ay saameyneysay qaybo badan oo ka mid ah Soomaaliya, haddana degaanka Xamar Jab-Jab ayaa si yar ay u saameeyeen dagaalka iyo rabashadda socotey.

Iyada oo laga faa'iideysanayo fursaddan, UNICEF waxa ay sii waddey taageeridda dhismaha. Iyada oo ay bulshada si hoose ula socotey, dhismaha dugsiga ayaa hadda la dhammeystirey, waxaana hadda socda banneyntii goobta. Xamar Jab-Jab ayaa ah mashruucii dhisidda dugsi ee ugu weynaa ee Muqdisho ay UNICEF ka fuliso in ka badan 10 sano. Si ay u muujiyaan taagaradooda iyo wadajirka, bulshada ayaa simi doonto dhulka oo dhisina doonta garoonka ciyaaraha, waxaana marka la sameeyo Guddiga Waxbarashada Bulshada (CEC) ay si buuxda uga qayb qaadan doonaan maamulka iyo maareynta dugsigooda. UNICEF, bulshada, iyo madaxda degaanka ayaa sugi la' maalinta dugsiga si rasmi ah loo furi doono, oo markaana ay ardaydu mar kale awood u yeeshaan in ay wax ku bartaan Dugsiga Xamar Jab Jab.

Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya waxa ay dhiirigelinayaan xuquuqda ay carruurtu u leeyihiin waxbarasho…

Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya – waxbarashada oo lagu wanaajiyo waxqabadyada xilliga dugsiga ka dambeeya

Barnaamijka Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya ee Soomaaliya ayaa dareen badan soo jiidanaya. Weji tijaabo ah oo ay taageertey Waaxda Horumarinta Caalamiga ah ee Ingiriiska (DfID), ayaa sanadkii 2008da lagu sameeyey la isuguna xirey 75 naadi oo ka jira dhammaan Soomaaliya, oo ay ka faa'iideysteen ilaa 5,625 carruur dugsiyada aasaasiga ah dhigata. Toddobaatan iyo shan Xoojiya Naadiyada Ardayda Ka Dhexeeya ayaa la tababarey laguna caawiyey soo helidda dugsiyo iyo soo abaabulidda carruur 8 – 14 jir ah iyaga oo adeegsanaya riwaaayado, doodo iyo munaaqashooyin waqtiyada ka dambeeya xilliga dugsiga. Halka ay suurtagal tahay, xoojiyeyaasha waxa ay la shaqeeyeen macallimiin, maamulayaal iyo saraakiisha dowladda ee u qaabilsan waxbarashada, taas oo barnaamijka Naadiyada Ardayda ka Dhexeeya siineysa tiir adag oo uu ku sii jiri karo.

Maaliyadda muddada-fog soconeysa ee uu barnaamijka ka heley DfID, ayaa la soo mariey Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Dib-u-soo-nooleynta iyo Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya. Hindisahan afarta sano

Cabdiraxmaan Maxamed Cali waa xubin ka tirsan naadiga Carruurta Ka Dhexeeya ee Soomaaliland. © UNICEF Somalia/2008

soconaya, waxa uu taageerayaa habab cusub oo kuwii hore ka duwan oo lagu gaaro waxbarashada Soomaaliya iyada oo la soo marayo UNICEF, UNESCO, iyo sidoo kale NGO-yada Caalamiga ah iyo kuwa Degaankaba. Waa iskuday lagu kordhinayo is-qorista ardayda, oo wax yar un ka badan 30 boqolkiiba, oo weliba ay ka muuqato isudheelitirnaan la'aanta jinsiga taas oo keentey in keliya 24 boqolkiiba ardayda dugsiyada dhigata ay yihiin gabdho.

In kasta oo soo gaaridda waxbarashadu ay muhiim u tahay dadaalka lagu higsanayo gaaridda Yoolalka Horumarinta ee Kun-sanadka (MDGs), haddana kor u qaadista tayada waxbarashada iyada oo dugsiyada laga dhigayo kuwo u habboon carruurta, gaar ahaan gabdhaha, ayaa fure u ah in carruurta lagu hayo dugsiyada ka dib marka ay waalidiintu oggolaadaan qiimaha ay waxbarashada tooska ahi leedahay. Barnaamijka naadiyada carruurta ka dhexeeya ayaa bixinaya tallaabo lagu kordhinayo ka qaybgalka ilmaha waxaana uu dhiirigeliyaa isdhexgalka wanaagsan ee dhex mara bartayaasha, barayaasha, waalidiinta iyo xitaa saraakiisha waxbarashada kaas oo ku saleysan nolosha dugsiga ee ka baxsan manhajka tooska ah. Habkaan ku dhisan xuquuqda loo leeyahay waxbarashada waxa sal u ah hab-gudbin caan baxay, oo markii hore uu sameeyey Machadka Caafimaadka Carruurta ee Ingiriiska [*The Institute of Child Health* (UK)] oo isticmaaley dhiirigelinta in ay kuwa iskufilka ahi kala bartaan arrimaha la xiriira caafimaadka iyo nadaafadda.

"Si aan u dhiirigelino ka-qayb-galka carruurta waxa aan isticmaalnaa hab uu ilmuhu xuddun u yahay. Waana hab ku dhisan lix tallaabo," ayuu yiri Suleymaan Xassan, oo ah Guddomiyaha Ururka *The Somaliland Student Assembly*, oo ah NGO-ga degaanka ee barnaamijka Carruurta Ka Dhexeeya ka fulinayey soonka Waqooyi Galbeed, Somaliland. "waxa uu ku bilowdaa aqoonsiga dhibta jirta. Markaa ka dib carruurta ayaa lagu hagaa tallaabooyinka dheeriga ah ee ka bilowda ka munaaqashoodidda arrimaha, helidda habka ugu wanaagsan iyo tallaabo-qaadkaba. Markaa waxaa ku xigaya qiimeynta iyo munaaqasho laga yeesho sida geeddi-socodka iyo tallaabo-qaadka loo wanaajin karo marka kan xiga. Waxa ugu wanaagsan ee uu leeyahay waa mid shaqeeya. Carruurtu waa ay jecel yihiin si dhaqso ah oo xiiso leh ayaana ay uga jawaabaan dhammaan arrimaha ka bilowda ilaalinta degaankooda, ciqaabta jirka ilaa xuquuqda ay carruurtu u leeyihiin in la dhegeysto ee aan la arkin un."

Iyada oo taageero ka heshey DfID, UNICEF waxa ay sanadkan qorsheynaa in ay kor u qaaddo tirada naadiyada dugsiyada iyo xoojiyeyaasha shaqeeya. Halkii keliya laga tababari lahaa xoojiyeyaal kale, waxaa la qorsheynayaa in la tababaro kaadiriin tababara tababarayaasha Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya kuwaas oo diyaar u ahaada in ay wax ka qabtaan baahida kordheysa ee loo qabo naadiyada dugsiyada ee Carruurta Ka Dhexeeya ee Soomaaliya oo dhan. Waxaa sidoo kale la diyaarin doonaa qoraal is-gaarsiin si fikradda loo gaarsiiyo Saraakiisha Waxbarashada Gobollada iyo NGO-yada degaanka iyo kuwa caalamiga ah, kuwaas oo la siinayo xog muhiim u ah sida loo dhisayo naadiyada dugsiyada ee Carruurta Ka Dhexeeya oo firfircoon iyada oo laga faa'iideysanayo casharadii laga bartey wejigii tijaabada ahaa.

Naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya – gaashaan u daruuridda doorarka dheddig-laboodka ee Soomaaliland

Iyada oo gaashaanka loo daruurayo caadooyinka dhaqanka iyo iyada oo carruurta lagu dhiirigelinayo in ay helaan isku-kalsooni iyo han ayaa barnaamijka Carruurta Ka Dhexeeya uu isbeddel ku keenayaa waxyaabo caadi ahaan bulshada Soomaaliyeed ka ahaa wax aan laga hadlin sidaa daraaddeedna ay adkeyd in saameyn lagu yeesho. Arrimaha dheddig-laboodka ayaana ka mid ah.

Dugsiga Aasaasiga ah ee *The State House*, oo ku yaalla mid ka mid ah kuwa ugu waaweyn xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay ee ku yaalla Hargeysa, Soomaaliland ee waqooyiga galbeed ee Soomaaliya, ayaa carruurta aad u soo jiitey. Ma ahan oo keliya in 360ka carruurta ah ee ku jira dugsiga ay tagaan xisadaha caadiga ah ee subaxda, waxaa ayba ka sii jecel yihiin in ay teendhooyinka fasallada u ah ay ku soo noqdaan galabtii iyada oo qoraxda Soomaaliya ay aad u kulushahay.

Waxaa la ogaadey in si xiiso leh ay uga qayb qaadanayaan Naadiga Dugsiyada ee Carruurta Ka Dhexeeya ee uu fududeynayo xoojiye tababaran, kaas oo diiradda saaraya mowduucyo ilmaha xuddun u ah. Kani waa mid ka mid ah 30ka dugsi ee Soomaaliland ka jira ee iyaga oo taageero ka helaya DfID/UNICEF, fursadda u heley in ay bilaabaan barnaamijka Carruurta Ka Dhexeeya kaas oo qayb ka ah barnaamij tijaabo ah oo ka socdey Soomaaliya ilaa 2008dii.

Dugsiga Aasaasiga ah ee The State House, ayaa barnaamijka Carruurta Ka Dhexeeya durba saameyn ku yeeshey sida loo arko (*attitude*) kaalimaha dheddig-laboodka qoyska ee ku xidideystey dhaqanka. Kaalimahan dheddig-laboodka ee uu dhaqanku qeexey ayaa keenaya in gabdhuhu si daran loo xummeeyo. Ma ahan oo keliya in waalidku ay door-bidaan in wiilasha ay dugsiga u diraan maaddaama gabdhuhu mar dhowba ay guursan doonnaan qoys kale, waxaa ay sidoo kale dareensan yihiin in gabdhuhu ay u baahan yihiin in ay "bartaan sidii ay u noqon lahaayeen xaas wanaagsan iyo reer wanaagsan" iyaga oo ku bilaabayana in ay guriga ka adeegaan iyaga oo aad u da' yar.

Waxaa fajaciso noqotey sida ay isu beddeshey sida ay u wax u arkaan taas oo durba noqotey isbeddello dhab ah oo ku yimaadda hab-dhaqanka carruurta iyo dhalinyarada ka qayb qaata naadiyada Carruurta Ka Dhaxeeya. Cabdiraxmaan Maxamed Cali, oo ah 11 jir dhigta fasalka 2aad ee Dugsiga The State House ayaa tusaale u noqon kara arrintan. "Hore uma ogeyn in ay mas'uuliyadeydu tahay in aan gabdhaha walaalahay guriga kala shaqeeyo. Tan iyo intii aan bilaabey in aan si joogto ah uga qayb qaato naadiga Carruurta Ka Dhexeeya ee Dugsigeena, gurigeena wax badan ayaa iska beddeley.

Munaaqashooyinkii aan ka yeelaney xuquuqda carruurta iyo doodihii ku saabsanaa mowduucyada ay ka mid yihiin "Gabdhaha waxa ay sidoo kale noqon karaan dhakhaatiir iyo saynisyahanno" ma beddelin oo keliya fekerkeyga ee waxa ay sidoo kale beddeshey waxa aan qabto. Hadda ma rumeysni oo keliya in ay waajibaadkeyga ka mid tahay in aan gabdhaha walaalahey ah aan ka caawiyo hawlahooda si ay iyaguna u helaan fursad ay dugsiga ku tagaan sida wiilasheyada oo kale, sidoo kale arrintaas wax baan ka qabtaa. Lixda tallaabo ee aan adeegsano ayaa ina tusinaya in falka uu ka wanaagsan yahay hadalka!"

Eeg bogga 4aad

Kordhinta helidda waxbarashada waa mid ka mid ah Yoolalka Horumarinta ee Kun-sanadka...

Arday wax ku baraneysey geed hoostii oo fasallo cusub heley

In geed hoostii wax lagu barto ayaa caadi ka ah Soomaaliya in kasta oo uu jawiga adag yahay. Ardayda ayaa waxaa ku dhacda dabaysha, busta iyo qoraxda waxaana si joogto ah u mashquuliya dadka meelaha maraya maaddaama ay wax ku bartaan meel bannaan ah. Dugsiyada noocaas ah, ma lahan agab (kuraas iyo miisas) ku habboon. Ardayda iyo macallimiinta ayaa kuraas iyo miisas ka dhigta wixii ay heli karaan sida dhagxaan, qasacado iyo alwaax oo ay u isticmaalaan kuraas ahaan.

Ardayda dugsiga cusub ee Dari Mara (kor) iyo hoos iyaga oo ku jira fasallada cusub © UNICEF Somalia/2008/9

Wacyigelinta iyo oggaalka bulshada ee muhiimadda waxbarashada oo kordhey awgeed ayaa ku dhaliyey bulsho xoolo dhaqato ah oo deggan tuulada Dari Mara ee Somaliland in ay bilaabaan dugsi noocaas ah oo markii hore ay carruurta ay wax ku baranayeen geed hoostii. Haseyeeshee, carruurta dhammaantood uma wada adkeysan karin xaaladaha adag. Laba sano ka dib markii dugsiga la aasaasey, kalabar carruurtii waa ay ka tageen, iyada oo 55 arday oo lagu bilaabey ay ka soo hareen 26. “Waxa aan sanadkii ugu horreeyey qorey 55 arday laakiin ilaa kalabar ayaa uga tagey dugsiga degaanka barashada oo adkaa daraaddii. Badi kuwa ka tagey dugsiga waa gabdho, “ ayuu yiri Cabdiraxmaan Cumar Xuseen, oo ah maamulaha dugsiga aasaasiga ah ee Dari Mara. Markii ay dhibaatadaa soo wajahday ayaa bulshadii degaanka waxa ay soo raadsadeen taageerada UNICEF taas oo ugu dambeyntii keentey in la dhiso dugsigii.

Haseyeeshee, ilaa bilowgii 2009ka, carruurta Dari Mara waxa ay wax ku baranayaan degaan u wanaagsan carruurta. UNICEF ayaa taageertey dhismaha laba fasal, xafiis, bakhaar iyo musqulo u kala soocan wiilasha iyo gabdhaha. Weelka kaydka biyaha ee dugsiga ayaa hubinaya in la helo biyo ardayda ku filan waxaana gabdhaha iyo wiilshada ay hadda wax ku baranayaan fasallo si wanaagsan loo qalabeeyey. Sanadkaan, dugsiga waxaa uu qorey 45 arday oo cusub waxaana sii badanaya gabdhaha ka faa’iideysanaya dugsiga cusub in kasta oo guryaha iyo dugsiga ay kala fog yihiin. Dugsiga oo ku yaalla buuraha Golis dhexdooda, meel 110 km bari ka xigta Hargeysa oo ah magaalo madaxda Somaliland, waxa dugsiga maamula Guddiga Waxbarashada ee Bulshada, oo hoos taga maamulka Degmada Mandheera ee gobolka Saaxil.

Dadaalka UNICEF ee lagu wacyigelinayo bulshada ayaa suurtageliyey in bulshadu ay aqoonsadaan, kala mudnaan siiyaan ayna u hawlgalaan wax ka qabashada baahiyahooda.

Xamda yar oo ku faraxsan dugsiga cusub

“Farqi weyn ayaa u dhexeeya dugsigii hore iyo dugsigan. Hadda sidii hore si ka wanaagsan ayaan u rabaa in aan dugsiga dhigto. Maalin kasta hal saac ayaan u soo socdaa dugsiga. Waxa iga go’an in aan dhammeysto dugsiga si aan macallimad u noqdo. Waxa aan jeclaan lahaa in dadka baro aakhis-qoraalka oo aan la dagaallamo aqoon la’aanta bulshadeyda haysata,” ayaa ay tiro Xamda Maxamed Maxamuud oo ah ardayad 12 jir ah. Cabdi oo 11 jir ah, ardayna ka ah dugsiga ayaa laba saacadood u soo socda dugsiga subax kasta. Waxa uu jeclaan lahaa in uu dhakhtar noqdo oo uu bulshadiisa u adeego. Gabdhaha iyo wiilasha dugsiga dhigta ayaa leh han iyo riyo weyn sida carruurta kale ee ku nool dunidaba. Dadaalkoodana xad ma laha. UNICEF oo la-hawlgasha bulshada degaanka ee Soomaaliya iyo deeq-bixiyeyaasha ayaa ay ka go’an tahay in ay hubiso in ilmo kasta uu xaq u yeesho waxbarasho tayo leh. Qayb ka mid ah dadaalkan waxa uu ku saabsan yahay in la dhiso kartida bulshada saboolka ah si ay u sameeyaan, u ilaashadaan oo ay si dhaxalgal ahna u maareeyaan dugsiyadooda.

Naadiyada dugsiyada ee carruurta ka dhexeeya – kor u qaadista tayada waxbarashada

Ka yimid bogga 3aad

Cabdiraxmaan ayaa intaa raaciyey natiijooyinka la taaban karo ee arrintan lagu gaarey, isaga oo ku faraxsan ayuu sheegey in walaashii ay ku gudubtey imtixaankii bishii Disembar 2008 oo weliba ay kaalinta labaad ka gashey fasalkeeda – arrintaas oo aan hore uga dhicin Dugsiga The State House!

Naadiyada Ardayda Ka Dhexeeya waxa ay ujeeddadooda tahay dhiirigelinta in gabdhaha iyo wiilashu ay si isla’eg uga wada qayb qaataan. Markii hore gabdhuhu waa ay ka warwareegayeen in ay ku soo biiraan.

Si tartiib tartiib ah, laakiin la isku hubo, ayaa ay ku noqdeen kuwo muhiim u ah dejinta ajandaha shirarka qaar badan oo ka mid ah Naadiyada Dugsiga iyo qaar badan oo ka mid ah Gudiyada Dugsiga, ee ay dhiseen Naadiyada Carruurta ka Dhexeeya, ee ay madax u yihiin gabdhaha. Mid ka mid ah gabdhahaas waa Nimco Axmed Maxamuud. Nimco waa 13 jir waxaana ay dhigata Fasalka 3aad ee Dugsiga The State House.

“Ka qaybgalkeyga Naadiga Carruurta u Dhexeeya ee dugsigeyga ayaa isbeddel badan igu sameeyey. Aad ayaan u xishoon jirey. Laakiin waxyaabaha aan kaga munaaqashoonno naadiyada ayaa iga caawiyey in aan kalsooni badan helo. Waxa aan bilaabey in aan weydiisto wiilasha walaalahay ah ee iga waaweyn in ay iga caawiyaan xisaabta oo mar kastaba igu adkeyd. Mudda badan iguma qaadan in walaalahay iga yaryar aan ka caawiyo layliga loo soo diro. Hadda waxa aan aaminsanahay in wax badan oo aan hore ugu riyoon jirin aan sameeyn karo.

Wacyigelinta bulshada ee UNICEF ayaa dadka awood u siisey in ay muhiimad siiyaan waxbarashada …

Horumar lagu gaarey waxbarashada dadban

Zeytuun Axmed waxa ay ka mid tahay gabdho badan oo ka qalin jebiyey Xarunta Waxbarashada Dadban ee Boosaaso, Waqooyiga-bari ee Soomaaliya ('Puntland') 2007dii markii imtixaankii dhexe ee heerka 4aad ee waxbarashada dadban la qabtey.

Hadda waxa ay kaalkaalisenimo ku baraneysaa Mac-hadka Gargaarka Degdegga ah ee Boosaaso. Hadda hal sano ayaa ka soo wareegatey markii ay bilowdey tababarka.

Sheekada Zeytuun waa mid taariikh cajiib ah leh oo ka soo bilaabata in ay fasalka 1aad kaga hartey waxbarashadii tooska ahayd ka dibna ka qalin jebisey xarunta Waxbarashada Dadban ka dibna iska qortey Mac-hadka Gargaarka Degdegga ah ee Boosaaso halkaas oo ay ku xaqiijineyso riyadeedii.

Zeytuun Axmed© UNICEF Somalia/2008

"Waalidkey waxa ay dhammaan walaalahey iga waaweyn u direen dugsiga iyaga oo yaryar, laakiin carruurtii yaryareyd ee aan annigu ka mid ahaa ma helin fursad sababtuna waa saboolnimo soo food-saartey qoyskeena markii carruurtii guriga ay bateen. Waalidkey ma awoodin kharashka waxbarashada oo ay ku jiraan ujuurada dugsiga, dharka iyo buugta.

Markii aan korayey waxa aan weligey u bogi jirey dadka wax akhrin kara oo qorina kara in kasta oo aanan ogeyn in erayada qorani ay micno leeyihiin. Waxa aan aaminsanaa maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda "Madmadow Allaa ku yaqaan" anniga oo u haysta xirfadda wax akhrinta iyo qoridda in ay tahay wax mucjico ah.

Markii dambe waxa aan ogaadey in akhris-qoraalku uu yahay xuquuq ay leeyihiin dhammaan dadka Soomaaliyeed. Ugu dambeyntii waxa dugsi la i geeyey markii aan 10 sani jirsadey.

Isla markiiba waxaa ii muuqdey in aan ka da' weynahay badi ardayda, sidaa daraaddeedna dugsigii ayaan isaga baxay sababta oo ah waxa aan dareemey ceeb iyo in aan da'deyda ku dhex jirin, anniga oo dareemey in aan carruurtaas ka tirsanaan karin. Sanado ayaan guriga iska joogey.

" Haseyeeshee, waxa aan markii dambe ku biirey Xarunta Waxbarashada Dadban ee Wadajir halkaas oo aan ka heley waxbarashadii aan yaraanta ku waayey. Xarunta oo ku taalla magaalo xeebeedda Puntland ee Boosaaso waxa ay awood ii siisey in aan dhammeystiro tacliinteydii dugsiga hoose."

"Waxa aan ku hanweynaa in aan dhammeysto waxbarashada aasaasiga ah si aan ugu yaraan wax u akhrin/qorina karo oo sidaa daraaddeedna aan ku helo fursad aan ku noqdo kaalkaaliso taas oo aan weligey ku riyoon jirey in aan mar un gaaro.

Markii hore waxa aan bartey akhrinta iyo qoridda Soomaaliga iyo sidoo kale xisaabta bilowga ah. Xirfadahaan ayaa iga caawiyey in aan dhammeysto afarta buug ee Waxbarashada Dadban oo kala ah, Caafimaadka iyo Sayniska, Xisaabta, Cilmiga Bulshada iyo Waxbarashada Ganacsiga.

Waxa aan ka mid ahaa kooxdii gabdhaha ahayd ee sanadkii 2008ka u fariistey imtixaanka dhexe ee Waxbarashada Dadban. Natiijo aad u wanaagsan ayaan imtixaanka kaga gudbey. Ka dibna waxaan u fariistey oo aan ku gudbey imtixaan tijaabo ah oo loogu talogalay ardayda soo geleysa Mac-hadka Gargaarka Degdegga Ah ee Boosaaso. Aad ayaan ugu farxay in aan heley fursad aan ku barto waxyaabaha aasaaska u ah xirfadda kaalkaalisanimada.

Hadda waxa aan bartaa sida loo caawiyo bukaannada ku sugan xaaladaha degdegga ah ee kala duwan ee cusbitaalka dibaddiisa iyo sidoo kale ku daryeellidda bukaanka ee cusbitaalka gudihiisa ah. Waxa aa qorsheynayaa in aan caafimaadka ku barto jaamacadda marka aan dhammeysto waxbarashada dugsiga sare."

Waxbarashada dadban oo soo celisey rajadii dhalinyarada Bartamaha iyo Koonufta Soomaaliya

UNICEF ayaa Waxbarashada Dadban ee Bartamaha iyo Koonfurta Soomaaliya ilaa 2003da ku taageereysey tababar macallimiin, bixinta agab iyo sameynta goobo waxbarasho oo loo sameeyo dhallinta iyo qaan-gaarka. Waxbarashada Dadban ayaa caadi ahaan loogu talogalay in ay fursado waxbarasho siiso dhallinta qaangaarka ah ee aan helin waxbarashada aasaasiga ah ee tooska ah.

Dheddiga ayaa ah aqlabiyadda dadka ku jira Waxbarashada Dadban. Ururka Horumarinta Haweenka ee IIDA iyo Hay'adda Swedish African Welfare Alliance (SAWA) iyo Lahawlgalayaasha degaanka ayaa gobollada Jubbada Hoose iyo Jubbada Dhexe ka wada badi xarumaha ugu wanaagsan ee Waxbarashda Dadban. Dufcaddii ugu horeysey ee dhalinyaradii ardayda ahayd waxa ay barnaamij laba sano ah oo Waxbarashada Dadban ah dhammeysteen sanadkii 2008da

Arday ka qalin jebisey Waxbarashada Dadban ee xarunta IIDA ee Bartamaha Soomaaliya © UNICEF Somalia/2008

376 dhalinyaro arday ah ayaa ka qalin jebiyey xarumaha dhalinyarada ee IIDA iyo SAWA. Ardaydaa qalinjebisey waxa ay barteen aqoonta aasaasiga ah ee xisaabta, akhris-qoraalka, sayniska iyo xirfadaha nolosha ee caafimaadka iyo ganacsiga. Badi dhalinyarada ardayda ah ee dhammeystey koorsooyinka Waxbarashada Dadban waa gabdho, iyada oo 54% ay barteen xisaabiyenimo. Siddeetan (45% gabdho ah) dhalinyarada ka qalinjebisey xarumaha IIDA iyo SAWA waxa ay sii wateen waxbarashadooda iyaga oo ku biirey dugsiga dhexe ee waxbarashada tooska ah. U gudbidda dhalinyarada qalinjebiyey ay u gudbayaan dugsiyada waxbarashada tooska ah ayaa tusineysa in barnaamijka Waxbarashada Dadban uu kaabayo isqorista waxbarashada dugsiyada tooska ah.

296 dhalinyarada qalinjebisey ah ayaa bartey xirfado la xiriira shaqo hoos oo yimaada farsamada gacanta. Koorsooyinka farsamo ee la bixiyo waxaa ka mid ah korontada, makaanikada, najaarnimada, kumbuyutarka iyo dawaarlenimada. Xirfadaha ay barteen waxa ay dhalinyarada qalinjebisey ka caawinayaan in ay shaqo helaan. Qorshayaashan ayaa wanaajinaya kartida dhalinyarada ay ku debarayaan nafahooda ayna si buuxda uga qayb qaadanayaan dadaallada bulshada lagu hormarinayo. Barnaamijka Waxbarashada Dadban waxa uu dhalinyarada siinayaa laba fursadood. Midda hore, barnaamijku waxa uu soo celinayaa rajadii iyo riyadii dhuntey isaga oo fursad labaad oo ay wax ku bartaan siinaya taas oo marka la dhammeysto u oggolaaneysa in ay galaan dugsiyada waxbarashada tooska ah. Tan labaad, waxa uu kuwa doonayaa in ay shaqo raadsadaan siinayaa fursado ay xirfado ku bartaan. Arrintan ayaa kaalin weyn ka qaadata wanaajinta noloshooda.

Barnaamijka waxbarashada dadban waxa uu bartayaasha siiyaa fursad labaad…

Bulshooyin hogaaminaya wax ka qabashada baahida waxbarashada – Mashruuca Dugsiga Hol Hol

Daafaha gobolka Awdal ee Waqooyiga Soomaaliya ('Somaliland') ee xuduudda la leh Itoobiya waxaa ku yaalla buulo reer miyi ah oo magaceedu yahay Hol Hol. Hol Hol waxa ay ku taallaa qiyaastii afar kiilo mitir meel bariga kaga beegan Boorama oo ah magaalo-madaxda gobolka Awdal waxaana ku nool dad lagu qiyaasey 1,200 oo qof, qiyaastaas oo laga soo qaatey 200 oo qoys. Adeegyo yar ayaa laga helaa Hol Hol, halahaa yar ee jirana waxaa bixiya oo dayactira bulshada.

Hol Hol weligeedba ma yeelan dugsi aasaasi ah. Xaddiga akhir-qoraalka ee bulshada ayaa aad u hooseeya, ardayda aan dugsiga dhiganna waxa ay hore ugu howlanaan jireen adeegga guriga iyo waxqabadyada nolol-raadsiga. Nasiib wanaag ayaa ay u ahayd markii 2007dii beesha Hol Hol loo doortey in ay ka mid ahaato ka-faa'iideystayaasha Barnaamijka Bulshadu Hoggaamiso ee Horumarinta iyo Soo Kabashada (CDDR). Barnaamijka CDDR waxa uu adeegsadaa hab ay bulshadu hoggaamiso oo loo maro horumarinta lagu awood-siinayo bulshooyinka in ay hoggaamiyaan aqoonsiga, kala mudnaan-siinta iyo xal u raadinta arrimaha iyo baahiyaha bulshadooda iyada oo loo marayo hab geeddi-socod laga wada qaybqaato.

Barnaamijka CDDR waxa uu raadiyaa in uu bulshooyinka siiyo awoodda iyo xukunka go'aamada iyo kheyraadka saameynta ku leh noloshooda. Waxaa ka mid ah geeddi-socod awood-siinta bulshada kaas oo keenaya isbeddel lagu sameeyo sida wax loo arko, dhiirigelinayana ka qaybgal iyo tallaabo qaad ballaaran. Natiijada ugu dambeysana waa horumarinta bulshada iyada oo la adeegsanayo kheyraad laga heley gudaha. Bishii Febraayo 2007, 20 beelood oo gobollada Awdal iyo Saaxil ku yaalla ayaa ay abaabushey UNICEF si ay u soo ogaadaan culaysyada ka haysta bixinta adeegga, u lafaguraan xaaladahooda, kala mudnaan siiyaan baahiyahooda ayna soo jeediyaan tallaabooyin lagu wanaajinayo xaaladdooda. Arrintan waxa ay soo gabagabeysey sameynta iyo dhammeystirka qorshayaasha waxqabad ee bulshada halkaas oo Hol Hol ku noqotey mid ka mid ah bulshooyinka ka faa'iideystey dadaalkan. Hol Hol waxa ay u aqoonsatey in ay waxbarashadu tahay mid ka mid ah waxyaabaha ay mudnaanta ugu horeysa siinayaan. Hore qoysaska doonayey in ay carruurtooda u diraan dugsi waxaa ay ku khasbanaayeen in ay u diraan bulshooyinka deriskooda ah halkaas oo dugsiga ugu soo sokeeya uu u jirey siddeed kiilomitir.

Qayb ka mid ah dugsiga Hol Hol ee cusub © UNICEF Somalia/11-2008

Xubnaha bulshada Hol Hol ayaa iyaga oo ka hoos shaqeynaya Guddiga Waxbarashada Bulshada (CDC), abaabuley kheyraad oo bilaabey dhismaha fasallo. Waxa ay ku guuleysteen in ay aasaaska iyo derbiyada fasallada ay dhisaan laakiin waxa ay ku guuleysan waayeen in ay dhammeystiraan dhismaha dhammaantii. Guddiga Waxbarashada Bulshada ayaa la shaqeeyey dowladda hoose ee degaanka waxaana ay UNICEF ku taageertey dhammeystirka mashruucooda iyo sidoo kale soo ururinta kheyraad maaliyadeed oo lagu bixiyo mushaarka macallimiinta. Intii uu socdey dhismaha, bulshada waxa ay soo abaabuleen carruurtii waxbarashada ku bilaabey geedaha hoostooda, haseyeeshee, jawiga oo xumaa daraaddii, waxbarashadooda marar badan joogsaneysey. Bishii Jannaayo 2009, ayaa dhismaha dugsiga la dhammeystirey, taas oo hubinsey in la helo waxbarasho tayo leh oo ka dhacda deegaan dugsi oo u wanaagsan carruurta Hol Hol. Hadda, 60 carruurta bulshadan ah ayaa dugsiga tagta, kuwaas oo 25 ka mid ahi yihiin gabdho.

Carruurta oo lagu awoodsiinayo dugsi Qur'aanka

Macallamiinta dugsiyada Qur'aanka ee Boosaaso ayaa aad ugu farxay markii ay qaateen tababarkoodii ugu horreeyey ee ku saabsanaa hababka baridda iyo barashada ee dugsiyada Qur'aanka iyo maaddooyinka kale la is dhexgeliyo.

Tiro 24 macallimiin ah (22 rag ah iyo 2 gabdhood) oo ka kala yimid afar dugsi Qur'aan, ayaa la isugu keeney Carmo si ay halkaas ugu qaataan tababar ku saabsan dhigista manhajka dugsiga aasaasiga ah. Waxaa la barey muqararka Soomaaliga ah oo ay hadda ka fulinayaan dugsiyada Qur'aanka ee maaddooyinka kalena la is dhexgeliyo.

Mashruuca Dugsiyada Qur'aanka ee Maaddooyinka kale la dhexgeliyey waa dadaal ku aaddan in waxbarasho gundhig ah oo tayo leh laga bixiyo Soomaaliya iyada oo la dhexgelinayo manhajka rasmiga ah ee dugsiyada aasaasiga ah. Dugsiyada Qur'aanka waxa ay bixiyaan waddo lagu kalsoonaan karo oo lagu bixiyo waxbarasho gundhig ah oo la wada gaarsiiyo badi carruurta Soomaaliyeed, maaddaama carruurta oo dhan la geeyo dugsiyada Qur'aanka si ay u bartaan Qur'aanka. Dugsi Qur'aanka ayaa ah kan ugu muhiimsan waxqabadka aqooneed ee Islaamka waxaana uu dhidibadda u aasayaa dhexgelinta waxbarashada aasaasiga ah ee tooska ah.

Macallin dugsi Qur'aan iyo ardaydiisa oo jooga Hargeysa, Somaliland© UNICEF Somalia/2008/Woki

Lafagurid joogto ah oo lagu sameeyey isqorista ardayda ee dugsiyada aasaasiga ah ayaa tilmaameysa in ay korodho 3% sanadkii. Nisbada guud ee isqorista Soomaaliya oo ah 30.7% ayaa ka mid ah dalalka ugu hooseeya nisbada isqorista ardayda dunida oo dhan.

Mashruuca Dugsiyada Qur'aanka ee Maaddooyinka kale la Dhexgeliyey waxa uu faa'iidooyin badan u leeyahay dugsiyada. Mashruucu waxa uu wax ka qabanayaa arrimaha la xiriira tababarka macallimiinta, isaga oo u maraya xirmo tababar oo looga dan leeyahay in uu dhiirigeliyo habka baridda ee uu ilmuhu xuddunta u yahay iyada oo diiradda la saarayo ka qaybgalka carruurta ka qayb galaan geeddi-socodka baridda iyo barashada, wanaajinta kaabayaasha dugsiyada iyada oo diiradda la saarayo bixinta agab dugsiyada u habboon, wanaajinta fasallada iyo iftiiminta iyo biyaha, fayadhowrka iyo nadaafadda dugsiyada.

Mashruuca waxa uu higsanayaa xoojinta maareynta iyo maamulka dugsiyada Qur'aanka ee maaddooyinka kale la dhexgeliyey isaga oo u maraya tababarka maamulayaasha dugsiyada iyo dhisidda iyo tababaridda Guddiyada Waxbarashada Bulshada (CEC). Wanaajinta qorsheynta ayaa loo marayaa keenista qalabka maareynta xogta dugsiyada. *Eeg bogga 7aad*

Mashruuca dugsiyada Qur'aanka waxa uu higsanayaa badinta helidda waxbarasho tayo leh…

Saameynta ay caadada haweenku ku leedahay waxbarashada gabdhaha

Bil kasta, waxa aan dugsiga ka baaqdaa 4 ilaa 5 maalmood. Xaaladdaydu marka ay sidaa tahay waxa aan ku kalsoonahay in aan joogo guriga halkii aan dugsiga tegi lahaa maaddaama aanan ka welweleynin ay marada wax iga gaaraan."

Faadumo ma ahan gabadha keliya ee Soomaaliya joogta ee maalmo ka baaqata dugsiga bil kasta. Gabdho badan oo kale oo qaangaarey ayaa sidoo kale ka baaqda dugsiga. Waxaa in laga xumaado ay tahay in arrintani ay sababtey caadada haweenka, waana arrin dabiici ah oo dhammaan haweenka ay helaan oo u baahan oo keliya in si habboon loo maareeyo si aaney si xun ugu saameyn noloshooda, ama aysan gabdhaha Faadumo oo kale ah ka reebin dugsiga. Caadada iyo maareynteeda ayaa weli ah arrin xujo ku ah dad badan oo Soomaaliya jooga, sida ay dalal badan oo Afrikaan ahiba ay ka tahay, mowduucan ayaa ah mid aan si furan looga hadlin, ilaa xad ay hooyooyinka qaarkood aaney la socon marka gabdhahoodu ay u bilaabato caadada.

Cilmi-baaris laga sameeyey Puntland iyo Soomaaliland, ayaa ay UNICEF ku doontey in ay ku fahamto sida ay gabdhuhu u maareeyaan caadada iyo in ay saameyn ku yeelato ka qaybgalkooda iyo waxbarashadooda. Caadada haweenka in ay tahay mid ka mid ah waxyaabaha gabdhaha ka hor istaaga waxbarashada ayaa looga hadley shirar ku saabsanaa waxbarashada gabdhaha oo lagu qabtey Boosaaso iyo Waajid.

Waxyaabihii ka soo baxay cilmi-baarista ayaa tilmaamaya in dhibtu aaneyn ahayn oo keliya maareynta caadada haweenku, laakiin ay jirto aqoon-xumo iyo in aan xog laga hayn mowduuca. Xogta ku saabsan caadada haweenka ayaa ay si yar uga hadlaan buugaagta sayniska, lagumana baro dhammaan dugsiyada. Dugsiyada Qur'aanka ayaa ilaa xad ka hadla mowduuca, laakiin waxa ay inta badan xoogga saaraan waxyaabaha ay diinta islaamka ka qabto sida ay tahay in haweenku u dhaqmaan marka ay caadada qabaan, tusaale ahaan waa in aanay tukan, soomin ama tegin masaajidka inta ay caadada qabaan.

Maaddaama xogta laga hayo ay yar tahay ayna tahay mid aan la isku halleyn karin, caadada haweenka ayaa loo tarjumtey in ay calaamad u tahay in gabadha ay gaartey guur. Mid ka mid ah wareysiyadii lala yeeshey waalidiinta waxa ay ka muujiyeen welwel in marka ay gabadhooda ay caadada ku bilaato ay xusuusiso waalidiinta in gabadha aaney xubin joogto ah ka hayn qoyskooda, waxaana waalidiinta qaarkood ayba bilaabaan in ay rag guursada u raadiyaan gabdhahooda, haddii ay dugsi dhigtaan iyo haddii kaleba. Arrintaa ayaana ah mid ka mid ah sababa ugu waaweyn ee keena in gabdhuhu ay dugsiga ka tagaan inta ay gudbayaan fasallada sare.

Iyada oo aan la goyn karin amaba aan si fiican loo heleynin qalabka caafidhowrka (tambooniyada) ayaa ka dhigan maareyn-xumada caadada haweenka. In kasta oo qalabka caafi-dhowrka laga helo magaalooyinka, haddana gabdhaha oo dhan ma goyn karaan. Degaannada miyigana dhibaatadu waaba ay ka sii daran tahay, maaddaama dhaqaalaha la hayo uuba iska yar yahay. Magaalooyinka iyo miyigaba, gabdhaha waxa ay isku ilaaliyaan gaballo maro ah, xaaladaha qaarna marooyinkaas ayaa dib loo isticmaalaa ka dib marka la dhaqo. In kasta oo meelaha magaalooyinka ah ee biyuhu aaney heliddoodu dhibaato ahayn arrintan la sameyn karo, haddana degaannada miyiga ayaa ay arrintani culays tahay.

Saameynta caadada haweenku ay gabdhaha ku leedahay la iskama indho tiri karo maaddama ay si toos ah ay raad ugu reebeyso tegitaanka iyo waxbarashada dugsiga. Dugsiyada oo aan badidoodu lahayn macallimiin haween ah ayaa uga sii dartey culayskaa. Macallimiinta haweenka ah ayaa yar, sida laga fili karoba, gabdhaha waa ay ka warwareegayaan in ay macallimiinta ragga ah ay wax weydiiyaan marka ay qabaan mas'alo la xiriirta caadada haweenka.

In kasta oo ay UNICEF dhiirigeliso in musqulo gooni u ah gabdhaha laga sameeyo dugsiyada, haddana cilmi-baaristan ayaa lagu ogaadey in badi gabdhaha aaney isticmaalin musqulaha dugsiga, arrintan ayaa loo saarin karaa dhaqanka laga aaminsan yahay gabdhaha iyaga oo loo jeedo gala musqulaha, haddii ay dugsiga tahay iyo haddii ay guriga tahayba. Sida arrintaa laga ogaan karo, badi gabdhaha waxa ay caafi-dhowrkooda ku beddelaan guriga. Waxaa markaa la dareemi karaa culayska iyo faham-xumada ay gabdhuhu qabi karaan marka ay fasalka ku jiraan.

Cilmi-baaristan ayaa bixinaysa xog la raadraaco si ay u hagto barnaamijyada lagu taageerayo gabdhaha waxaana ay talooyin dheeri ay ku bixinaysaa in la sameeyo cilmi-baaris lagu sameeyo suurtagalnimada in la soo saari karo qalabka caafi-dhowrka oo qiimihiisu hooseeyo kaas oo laga sameeyo waxyaabo degaanka laga heli karo. Iyada oo la raacayo cilmi-baarista, waa in bulshooyinka loo awood-siiyaa soo saaridda qalabka caafi-dhowrka oo la goyn karo kaas oo ay tahay in la siiyo gabdhaha dugsiyada ku jira.Talooyinka dheeriga ah ee la bixiyey waxaa ka mid ah in loo qareemeeyo lana qaado olole lagu dhiirigelinayo in ay gabdhaha isticmaalaan musqulaha, iyada oo xoogga la saarayo waxbarasho ka tarjumeysa dheddig-laboodka oo laga fuliyo dugsiyada carruurta u habboon iyo qaadista tallaabooyin lagu shaqaaleynayo, lagu tababarayo laguna hawlgelinayo macallimiin haween ah. Si loo saxo khaladka laga aaminsan yahay baaluqidda iyo caadada haweenka, cilmi-baaristu waxa ay soo jeedisey in la sameeyo qoraallo xaqiiqi ah (*fact sheets*). Gabdhaha ayaa sidoo kale loo awood-siinayaa in ay "ka hadlaan" iyada oo loo marayo naadiyada Carruurta Ka Dhexeeya. UNICEF waxa ay mar walba ku dadaaleysaa hubinta in gabdhaha iyo haweenka Soomaaliya ku nool ay helaan xuquuqdooda bani'aadamnimo. Iyada oo DfID ka hesha taageero hoos timaadda Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Dib-u-soo-nooleynta iyo Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya UNICEF waxa ay ku dadaaleysaa in ay kordhiso in ay gabdhaha helaan waxbarasho iyada oo wax ka qabaneysa caadada haweenka iyo caqabadaha kale. Cilmi-baaristan ka dib, UNICEF waxa ay Soomaaliya ka heshey la-hawlgalayaal istiraatiiji oo degaanka ah si ay ugala shaqeeyaan waxqabadyada ku aaddan caadada haweenka. Ujeeddada laga leeyahay arrintan waa in la hubiyo in xuquuqda gabdhaha ay leeyihiin waxbarashada aaney caqabad ku noqon qaan-gaariddooda, in ay wax ku bartaan degaan laga ixtiraamo sharaftooda iyo qiimahooda.

Carruurta oo lagu awood siiyo Dugsi Qur'aanka

Eeg Bogga 6aad

Arrinta ugu muhiimsan waxa ay tahay in mashruuca uu diiradda saarayo hubinta waxbarasho tayo leh. Taana waxaa lagu gaarayaa iyada oo la bixiyo buug u habboon oo kuwa akhriska ah, iyo sidoo kale tababaridda macallimiinta.

Magaalada Hargeysa, 16 macallimiinta dugsiyada Qur'aanka ah ayaa la tababarey. Tababarka waxaa fuliyey Wasaaradda Diinta oo kaashaneysa Wasaaradda Waxbarashada.

Mashruuca Dugsiyada Qur'aanka ee Maaddooyinka kale la dhexgeliyey ayaa hadda ku jira marxalad tijaabo ku ah Wasaaradaha Waxbarashada ee Puntland iyo Somaliland si mustaqbalka loo ballaariyo.

Waxaa looga dan leeyahay in wasaaradaha lagu tirtirsiiyo in ay sameeyaan siyaasad-habraac kor loogu qaadayo dugsiyada Qur'aanka ee doonaya in ay gacan ka geystaan ballaarinta waxbarashada tooska ah ee gundhigga ah.´

Gabdho jooga dugsi Qur'aan ku yaalla Somaliland © UNICEF Somalia/2008/Woki

Mashruuca oo DfID ka helaya taageero maaliyadeed oo hoos timaadda Iskaashiyaga Istiraatiijiga ah ee Dib-u-soo-nooleynta iyo Horumarinta Waxbarashada Soomaaliya, mashruuca waxa uu hadda ka faa'iideysnaya 919 carruur ah oo ku nool Soomaaliland iyo Puntland. Sanadkaan, mashruucu waxa lagu ballaarin doonaa 18 Dugsi Qur'aan oo ku yaalla Puntland iyo Somaliland.

Gabdho badan oo qaangaarey ayaa dugsiyada ka taga marka ay caadada qabaan…

Dib ugu celinta bulshada iyo is-beddel sameynta

"Buug ay UNICEF bixisey ayaan wax ku qorey, anniga oo isticmaalaya qalin ay UNICEF bixisey"

Iyada oo fadhida uuna ka soo horreeyo miis weyn Xafiiska UNICEF Boosaaso, Faa'iza Cabdirashiid waa ay dhoola-caddeyneysaa. Maanta bulshada ayaa ay ugu adeegi kartaa qaabkii ay weligeedba ku riyoon jirtey. Riyadeeda ayaana u rumowday.

Faa'iza Cabdirashid © UNICEF Somalia/2009

Faa'iza (sawirka midig) oo ku dhalatey magaalada Kismaayo ee Koonfurta Soomaaliya sanadkii 1985 waxa ay ku soo kortey Garoowe, Waqooyiga Bari ee Soomaaliya ('Puntland') iyada oo ka tirsan qoys siddeed qof ka kooban oo ay ku jiraan saddex gabdhood oo walaalaheed ah, laba wiil oo walaalaheed ah, iyo hooyadeed iyo aabaheed.

"Markii ay burburtey dowladdii dhexe 1991, dhammaan kaabayaashii ayaa la burburiyey Soomaaliya oo dhan. Hal dugsi oo shaqeynayey ma jirin. Waxaan ka mid ahaa carruurtii ay nasiib-darradu heshey ee dugsiyada waayey," Faa'iza ayaa sidaa u sheegtey UNICEF.

"Sanadkii 1992, waxa aan ku jirey dugsiga Qur'aanka, halkaas oo aan ka bilaabey in aan barto farta Carabiga iyo Qur'aanka Kariimka ah. Bishii Agoosto 1992, waxa ay ii ahayd bilow cusub. Macallimiin ayaa si iskood ah isu abaabuley oo dugsi ka furey xaafaddeena (Xaafadda Waaberi – oo Garoowe u dhow). Ardayduna waxa ay bixinayeen ujuuro aad u yar. Dugsiga waxaa la dhihi jirey Iskuulka Danyarta iyo Saboolka. In ka badan 100 arday oo qoysaska deriska ah iyo kuwa magaalada ayaa isqorey. Dugsiga aad buu u liitey, fasalladu saqaf ma lahayn, kuraas iyo miisas iyo albaabo midna ma jirin. Ardaydu waxa ay buug ahaan u isticmaali jireen baakado. Kuwana maba haysan wax ay wax ku qortaan ee waa ay fadhiyeen oo casharka ayaa ay dhegeysanayeen."

"In kasta oo xaaladda dugsigu liidatey, waxa aan ku taamayey in aan waxbarto waxaana aan ka faa'iideystey macallimiintii joogtey. Waalidiinta ayaa sii waday in ay keenaan carruur kale waxaana markii ay laba bilood ka soo wareegatey markii la furey, laba fasal oo kale ayaa lagu darey. Saddexdii fasal markii uu noqdey waxaa dugsiga dhiganayey 300 oo arday. "bilowgii 1993dii ayaa waa cusub uu u baryey dugsigeenna. Barnaamijka waxbarashada ee UNICEF ayaa laga bilaabey Soomaaliya. Dugsigeyga ayaa heley buugta qoraalka iyo qallimaan. Mar dambena, dugsiga waxa uu heley buugta akhriska iyo alaabo kale. Halkii buug iyo qalinkii keliya ee aan helney ayaa macno weyn noogu fadhiyey anniga iyo ardayda kale ee dugsigeyga. Buug ay UNICEF bixisey ayaan wax ku qorey, anniga oo adeegsanaya qalin ay UNICEF bixisey.

"Maalinkaa laga bilaabo waxa aan aan boholyow u qabey in aan wax badan ka ogaada UNICEF, waxaana igu dhashey rabitaan ah in aan la shaqeeyo UNICEF, oo aan markaa u fahmey in ay tahay "hay'ad taageerta carruurta". Waxa aan dareemey in shaqada UNICEF ay wax ku kordhineyso carruurta Soomaaliya. Waqtigaa gabdho tiro yar ayaa dugsiga ku jirey, heseyeeshee, waxbarashadeyda ayaan sii watey anniga oo aan niyad-jebin. Waxa aan dhammeystey dugsiga aasaasiga ah waxaana aan u gudbey dugsiga sare. Markii aan dhammeystey dugsiga sare, waxa aan deeq waxbarasho ka heley NGO caalami ah si aan cilmiga caafimaadka ugu soo barto Jaamacadda Egerton ee dalka Kenya. Markii aan soo dhammeystey waxbarashada waxa aan u soo shaqeeyey Hay'adda *Care International* haddana waxa aan qabtaa hawsha aan ugu jeclahay qabashadeeda, oo ah in aan u adeego carruurta iyo haweenka anniga oo ka shaqeeya UNICEF. Waxa aan ahay xiriiriyaha degaanka ee HIV/AIDS. Shaqada UNICEF waxa aan kaga qayb qaadan karaa wanaajinta nolosha carruurta nugul ee ku nool Soomaaliya oo dhan. Riyadeydii ayaa ii rumowdey, taas oo kor u qaaddey yoolka aan higsanayo: oo ah in aan gaaro (gargaaro) carruur ka badan kuwa Soomaaliya ku nool."

**Faa'iza waxa ay UNICEF Soomaaliya ku soo biirtey sanadkii 2007. sida Faa'iza oo kale, gabdho iyo wiilal badan oo Soomaaliya ku nool ayaa ka faa'iideysanaya qalabka dugsiyada ee ay bixiyeen UNICEF iyo ururo kale. UNICEF waxa ay gacan ka geysatey sameyntii manhajka qaranka ee dugsiga aasaasiga ah sanadkii 2002. Laga soo bilaabo waqtigaa buugta akhriska iyo bare-kaabayaasha ayaa la daabacadey, oo dibna loo daabacay lana bixiyey. Waqtigan UNICEF, waxa ay taageereysaa dib u eegis ay UNESCO ku sameyneysa buugta qoraalka taas oo qayb ka ah Barnaamijka Iskaashiga Istiraatiijiga ah ee Waxbarashada.

Waxbarashada waa calaamadda rajada ee Soomaaliya

Eeg bogga 1aad

UNICEF waxa ay la shaqeyneysaa la-hawlgalayaashan, iyo Wasaaradda Waxbarashada, si loo hubiyo in ay waaraan guulaha laga gaarey helidda waxbarashada tayada leh, iyo in dhammaadka 2010ka in 100,000 oo arday cusub ah ay is-qoraan fasallada dugsiyada aasaasiga ah. Si loo gaaro yoolkan dhexdhexaadka ah, waa in la xoojiyaa kartida ay dowladdu u leedahay taageeridda iyo maareynta nidaamka waxbarashada, waana in la wanaajiyaa tayada cashar-bixinta, waa in lagu xoojiyaa agabka iyo buugta akhriska, waana in la dhisaa lana dayactiraa dugsiyo u habboon carruurta. Sida aad ka baran karto caddadkan Warsidaha Carruurteenna, UNICEF iyo la-hawlgalayaasheeda waxbarashada waxa ay wanaajinayaan nolosha carruurta iyaga oo u maraya barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan.

Waxa aan la shaqeynaa Guddiyada Waxbarashada Bulshada, naadiyadda Carruurta Ka Dhexeeya, dugsiyada waxbarashada tooska iyo tan dadban, dugsiyada Qur'aanka, dalladaha waxbarashada ee gobollada, hay'adaha dowladda ee waxbarashada ka shaqeeya, NGO-yo, hay'adaha Qaramda Midoobey sida UNESCO, WFP iyo UNOPS iyo hay'adaha dowladda ee waxbarashada ka shaqeeya. Waxa aan aaminsanahay in qaabkaan wax looga qaban karo farqiqa dhinaca waxbarashada ee u dhexeeya dheddig-laboodka, iyada oo la dhisayo nidaam waara oo fursado waxbarasho tayo leh siiya aqlabiyadda weyn ee carruurta iyo dhalinta ka maqan dugsiyada. UNICEF waxa ay ka mahadcelineysaa taageerada ay deeq-bixiyeyaasha siiyaan hawsha ay ka waddo Soomaaliya waxaana ay rajeyneysaa in la sii wado.

Wixii xog dheeri ah oo ku saabsan barnaamijkeena ama sida aad noo taageeri karto, fadlan nagala soo xiriir:

Christian Balslev-Olesen, Representative	**cbalslev@unicef.org**	**+ 254 722 514 569**
Denise Shepherd-Johnson, Chief of Communication	**dshepherdjohnson@unicef.org**	**+ 254 722 719 867**
Iman Morooka, Communication Officer,	**imorooka@unicef.org**	**+ 254 713 506 076**
Robert Kihara, Communication Officer	**rkihara@unicef.org**	**+ 254 722 206 883**

Nagu soo booqo www.unicef.org/somalia